

SHIR SANADEEDKA JAALIYADA GEESKA AFRIKA 2017 OO ÖREBRO LAGU QABTAY



Shir sanadeedki Jaaliyada Geeska Afrika oo xalay ku qabsoomay Vivalla Skolan Kulturarena ee Magaaladan Örebro(20170312). Waxaa lagu soo bandhigay wax qabadki sanadkii tagay 2016 ee Jaaliyada iyo warbixinta miisaniyada.

Waxa si faah faahsan oo qoto dheer wax qabadka uga war bixiyay Guddomiyaha Mahdi Axmad-Mahdi Gaab-asago soo bandhigay qorshe howledka jaaliyada sanadka soo socdo. Jaaliyada ayaa sandkii tagay waxey xooga saartay sare u qaadida aqoonta ardada Soomaliyeed oo wax ku kala barta dugsiyada hoose, dhexe iyo sareba.

Kulanka oo ay soo xaadiren aqoon yahan wax ku ool oo ka kala socday bulshada Soomaliyeed ee magaalada iyo madax Swedish ah oo maamulka wax ka heyso waxa xiriirinayay Yusuf Abdow xildhibaan golaha degaanka Örebro.

Qasnajiga Jaaliyada Cabdulqadir Kadinle ayaa u mahad celiyay xubnaha oo sanadkii hore dhigalka si hagar la'aan ah u soo bixiyay taaso kor u qaadeysa dakhliga.

Mikail Blixit oo ah madaxa shirkada guryaha iyo xafiisyada ayaa Soomalida ugu hambalyeyay guri ay shirkada gadatay oo lagu wareejin doono jaaliyada. Gurigaas oo wax loogu qaban doono dumarka iyo caruurta xaafadda Vivalla.

Shir sanadeedka ayaa looga hadlay abaaraha ka taagan guud ahaan Soomaliya. Cabdifatax Baneimun oo ka socday Hey'ada AAYO Development foundation ayaa ka warbixiyay baaxada iyo dhibaataada inta ay ay la eg tahay iyo in ay bilaaben biyo dhaamin iyo jikooyin dadka lagu quudiyo kana codsaday dhamaan dadka Soomaliyeed iney gacan qabtaan walaalaheena dhibateeyan



Waxa diyaariyay
Hassan Osman
Örebro